Dhidar iyo Dhurwaa iyo Ri’ Dhaaqo ah(Gabay)

Gabaygan waxaa tiriyey Abwaan Jaamac Nuux Cawdgale, oo ah gabyaa ay iska dhaleen labo gabyaa. Aabbihiis Xaji Nuux Muse iyo Hooyadiis Bullo, labadooduba way gabyi jireen , isaguna Abwaannada gobolladan caanka ka ah ayuu safka hore kaga jiraa.
Markii ciidamadii u dagaallamayey maxaakiimta laga saaray gobollada jubbooyinka 02/01/07, oo ahayd goobtii ugu danbeysey ee ay ciidan ahaan uga baxeen ayuu Abwaanku curiyey gabaygan oo cinwankiisu ahaa Dhidar iyo Dhurwaa wuxuuna ku bilaabanayey sidan:-

1) Dhidar iyo Dhurwaa-baa	Wax dhexmaray Ri’ dhaaqa ah
2) Hadba kii dhaqaaqay	Dhiniciisa raacdaa
3) Midna xoolo dhaqashiyo	Kama rabo dhaqaalee
4) Dhabtu waa inuu cuno	Dabadeed Dhurwaagii
5) Waa dhaartay oo yiri	Dhidar may maqlaysaa
6) May dhegaysanaysaa	Dhab ma ii taqaannaa
7) Dhutintaad arkaysaa	Dhib i gaarey maahee
8) Waa dhalashadii hore	Maxaan reer u soo dhacay
9) Ka dhawaajey leylkii	Ka dhexkacay baraarkii
10)Goortaan la dhaadhacay	Ku dhimo ay yiraahdeen
11)Dhegcas dhogor baraar-liyo	Dheereeye Faras iyo
12)Ma dhaafaanka Geelaan	Ka dhergaa anoon dhigin
13)Adna Caalle dhidaroo	Dhaandhaana baad tahay
14)Aniguna Dhurwaa aan	Dhirtu waabin baan ahay
15)Horta maysu dhigannaa?	Waa inaad is dhiibtaa!!!
16)Dhidarkii xanaaq-buu	Dhudhumada is dhaafsaday
17)Sarraxuu ka dhigay Geed	Dadabadana dhulkuu dhigay
18)Wuxuu yiri Dhurwaayow	Dhegta wayga maqashaye
19)Dhab ma ii taqaannaa?	Maxaan Ari dharaartii
20)Dhawr qof ay la joogeen	Lasoo dheelmay galabtii
21)Xerodhaafay fiidkii	Isago dhooban meel dul ah
22)Intaan dhinac kasoo galay	Orgi dhaawac kaga tegey
23)Intii kale halkaas dhigay	Arigaan dhabbada dhigo
24)Horta maxaad ku dhaantaa?	
25)Haddii laysku dhiiddhiyey	Dhanaanaadey Xaalkii
26)Ninba dhoonbirkiisuu	Soo dhexdhigay rasaastii
27)Markay dhawr ayaamood	Xabbaduhu dhacaayeen
28)Dhimashadu ma meel dayan	Dhaawacana warkii daa
29)Hadal iyo Dhammaantiis	Dhidarkii baquu galay

30)Ri'dii dhaaqada ahayd Wax u haray Dhurwaagii
31)Waase wuxu ka dheefaa.!!!

Waxaa gabaygaasi ka jawaabey MMX (Gaani)_ oo Abwaan Jaamac Nuux Cawdgale Abti u yahay, Maalmo sagaal ah marii dawladdu Xamar joogtey wuxuuna ku bilaabay sidaan:

1) Abti dheeshi hore ee Dhidarkiyo Dhurwaagii
2) Waxay joogtey Dhidarkii Oo dhoonbirkiisii
3) Kula dhuuntay Duurkoo Ridii dhaaqada ahayd
4) Uga tegey Dhurwaagii

5) Markuu dhawr ayaamood Dhamacdii rasaastiyo
6) Dhawaaqeedi moogaa Ayuu soo dhaqaaqoo
7) Isagoo dhirfaayoo Dhabbadiisa haystaa
8) Dhagar hooyadeed iyo Dawaco u dhawaaqdoo
9) Tiri caalle Dhidaroow Xaggaw dhabacsanaysaa?

10) Wuxuu yiri dhallaan iyo Dhal baa layga laayoo
11) Ri' baa layga dhacayoo Dhurwaa baa i helayoo
12) Dhirbaaxadi i gaartana Dhegahay qablamayee
13) Cabbaar baan dhakinayaa!!

14) Dhagar badan Dawacadii Dhidaryohow waxay tiri
15) Dhiirran hooyaday baa Igu tiri dhashiisiyo
16) Ogow Dhidarku waa doqon Waqaa yay ku dhinac marin
17) Anigana Dhab inay tahay Dhareerkaad qubaysiyo
18) Dhaayahay markhaantiya Waxyohow dhaystaweyn lihi

19) Dhabankiyo wejiga iyo Dhafoorkaaga kama arag
20) Dhibi inay ku gaartaye Dhidarow maxaa dhab ah?
21) Dhibbanaha sidaada ah Dhinac inu u seexdiyo
22) Jiif uma dhadhamayee Ma fal baa laguu dhigay
23) Maxay tahay dhabcaalyohow Cabbaar baan dhakinayaa?

24) Dhidarki wuxuu yiri Deyooy dhiirrigelintiyio
25) Dhiilladaaad i gelisaa Dhogortayda kicisee
26) Dhabbo igu tilmaanoo Ma dhaafaanka talada ah

27) Isii aan dhaqaaqee

28)	Waxay tiri dhakhsaba soco	Adigoon doc kale dhugan
29)	Dhurwaaga iyo dhaaqada	Dhexdoodii fariisoo
30)	Dhufeysyaal ka soo qodo	Sido dhoonbir- kaagana
31)	Doori dhalanka kaaga ah	Maalintii dhurwaa noqo
32)	Ha illaawin dhutintana	Habeenkiina dhidar noqo
33)	Dhulka oo dhan miinee	Yaan cidi ka dhaansane
34)	Dhaab ceelashoo idil	Dharaar ama habeenkii
35)	Rasaastii dhashiikaha	Dhan walababa isaga tuur
36)	Qaar aan wax dhimin iyo	Dhurwaagii laftiisiyo
37)	Dhaaqada Ri'da ah iyo	Dhirta bilicda wacan iyo
38)	Wax kastoo dhawaaqiyo	Dhimashada ha xaalayn
39)	Ha u joojin dhawdhaw	Dhimbil lagugu soo ridey
40)	Madfacyada dhawaaqana	Yay dhegaha nooluhu
41)	Moogaan dharaar qura	Isbaarooyin dhigashada
42)	Dhiirrigeli dan weeyee	Dhaca iyo xatooyada
43)	Dharaar iyo habeen fuli	
44)	Dhib hadday dareentoo	Ri'dii dhaaqada ahayd
45)	Dhawaaqeedu kuu baxo	Warka yaadaddo u dhiib
46)	Dheh-na waxad tiraahda	Haddaan anigu Dhidar ahay
47)	Dhurwaa iyo Dhurwaa-kaal	Iyo soo dhoweystiyo
48)	Wanka dhogorta weynee	Dhexdhexaadka sheegtiyo
49)	Dhiidhiiya badatiyo	Daayeer dhalaandhuux
50)	Dhacadiid ku cuna iyo	Dhilow-yahanka qayshaba
51)	Midna dhaafimaayee	Waa dhibib tiraayaa
52)	Waxa haatan dhacayiyo	Dhismayaasha dumay iyo
53)	Dhimashadana kama xumi	Rasaastaas dhacaysana
54)	Anigiyo dhurwaaguba	Ways dhaafsanaynaye
55)	Keligay maxaan dhimay	Cadligii miyaa dhumay?
56)	Dhuundhuumashada iyo	Sida dhaaqo loo dago
57)	Cidi kuguma dhaantee	Iyadoo dharaaroo
58)	Cidiba aanay dhaadayn	Cadow maalin soo dhaca
59)	Ridii dhaaqada ahayd	Dhudhumada ka jebiyoo
60)	Ubucdeeda dhaawacan	Ha arkeen dhallaankuye
61)	Wargeysyada halagu dhigo	Dhallintiyo magaratada
62)	Ugu sheeg dhurwaagaa	Dhaawacay Ri'diini
63)	Illaa hilib ma dhaafee!!	
64)	Haddaad talo dhaguug tahay	Biyo kama dhibcaankaas
65)	Iga qaado dhidaroow	Haddii kale i dhaafoo

66)	Dhacadiid halkaagaas	Ilaa lagugu soo dhego
67)	Dhidarki wuxuu yiri	Talo dhaxal galoo culus
68)	Oo lagu dhaqaaqiyo	Dhabbaad ii tilmaantaye
69)	Dhakhso inan u raaciyo	Fulinteeda ii dhaaf
70)	Wuuna soo dhaqaaqoo	Dhufeysyaal samays iyo
71)	Falal dhimasha keeniyo	Ceelashoo la dhaabiyo
72)	Dhib ay wada dareemeen	Dhaaqadiyo Dhurwaagii
73)	Ayuu geystey dhidarkii	Balse waxaynu dhawrnaa
74)	Dharaaraha Rimmani waxa	Ay dhali dhowaan iyo
75)	Dhurwaagiina wuxu falo	Hadal iyo Dhammaantiis
76)	Kama sii hordhacayee	Abti dheeshu waa kow

MMX Gaani 755782

Gabayadii hore markay is dhaafsadeen Abwaaniinta kala ah Jamac Nux Cawdgale iyo MMX Gani, ayaa waxa soo galay sida caadada suugaantu tahay Abwaan saddexaad oo ah Abwaan

Saalax Xaashi Carab oo ku sugan Magaalada Jabbuuti ee ah Caasimadda dalka Jabbuuti.
Abwaan Saalax isaga waxay ugu muuqatay inaan Ri'du dhaaqo ahayne raggii dhaqan jirey hagraday oo baday inay bahalo weheshato.
Abwaan Saalax wuxuu tixdiisa ugu yeerayaa Abwaaniinta kala ah Jaamac Kediye, Ahmed Farax Cali -Idaajaa, Axmed Sh Jamac C/Qadir Cabdi Shube, Xasan Ganey, Hurre Walanwal, Cabdi Muxumud Ammiin iyo Bacadle, isagoo leh Raggaas ayay ahayd inay dhacan aan dhawrtu u soomarin u dhigaan Ri'da.
Abwaan Saalax XAASHI Labadii maanso ee hore wuxuu ula kala baxay Dhidarley Dhurwaayayley oo Tii hore uu u bixiyey iyo tii Labaad oo uu ula baxay Biyo kama dhibcaan, isagoo tixdiisana ugu wanqalay DHIMRIS. Abwaan Saalax wuxuu ku bilaabay sidan:

DHIMRIS

Jaamacow Dhurwaayaley
Dhidarley tixdii aad
Dhexdhexaadka ka ahayd
Oy dhinacca kaga tiil
Abtinnimo isdhawr iyo
Dhiirrani u doodkiyo
Gaanni tuu ka dhiibtoo
Dhigan oo qoraalaa
Dhambaalkoodu noo yimi!

Dhowaano ba in bahalladu
Dhawaaqoodu baxayoy
Aadmigii dhaxleen oo
Dhoollatusad ahaayeen
Nin dhug laa ogaayoo
Dhuganaayey xaalkoo
Qayladay dhigaysiyo
Ri'dan dhimanla' alalkeed
Qalaadkeedu dhibayee,
Waxse aan horuu dhicin
Oo dhiffa u dhigankeed
Sidaad dheehashada guud
Dhidarley Dhurwaaley
Dharkii ay lahaydiyo
Dhuuga ugu marriintoo
U dhigaandhigtoo wacan!

Dhab waxaad u baratood
Dhaqankooda badisaan
Faalladood ku dhibin oo
Tilmaantaad ka dhiibtaa
Badi dhaxalgal noqotee
Tayda aan u dhaadhdhaco

Una dhuujo dhexxirkoo
Aan idhaahdo dhaqayiyo
Ri'du daaqo maahee
Way soo dhuntoo kayn
Laga kala dhaqaaqiyo
Dhawrtaa diloodtoo
Dhoylaawe sheegtiyo
Raggii dhaqanjiraw kaday
Inay dhogorxumaadtoo
Nabsi baa halkaa dhigay!

Waxay dayadtay dhabarrada
Intii fiiri dheerida
Laga dheeganjirey oo
Kolka Ganey[1] dhaqaalkeed
Aqoon uu ku dhaaboo
Xalka uu u dhaadhdhaco,
Oo Bacadle[2] dhicinteed
Dhabbada uu u xaadhoo
Dhagaxyada ka wada guro,
Axmeddadu[3] na DhuuxGorad
Dhankay ugu danbaysiyo
Cudurkay u dhimadtiyo
Waxxa dhacay wixxii dhigay
Kolkay kala dhigdhigiddeed
Runta ay ka dhiibtaan,
Oo Hurroo[4] ku dhaadtoy
Beri dheemman la ahayd
Ku dhiirrado tusmayntiyo
Inuu dheelsha soo galo,
Cabdi[5] baa ku dhacayee
Waxa ay dhibsanaysoo
Dhiman goorta uu sugo,
Oo Jaamac[6] dhacantaye
Dhab u dooniddeed baaq
Hees uu ku kala dhigo,
Oo Shube[7] dhal aan korin
Bista dhaaxo uu wado
Dheelmintooda dhaafoo
Raadsho tii dhalshoo maqan,
Kolkay dhammi abwaannadu
Dhinac walba ka eegaan
Waan hubaa dhaqaalayn
Inay garadyo-dhaadyadu
Isla dhigi karaan meel
Sida ri'datan loo dhaqo

Dugaag looga dhiciyoo
Looga liso shan dhiil iyo
Dhigto weli ba sii taal!

Dhudda kale Garaadow
Jaamacow tusmayn dhiman
Oy malaha dhidarkiyo
Dhurwaagu ba qarsanayeen
Baanaha ka dhaafeen
Runta aan ku dhaaboo
Aan ku soo dhowaadee,
Siday badi dhakhaatiir
Rogid dhalanka badiyaa
Xaqiiqada u dhigayaan
Dhidarku maaha dhidarkii
Dhulka joogi jirey oo
Dadku dhaqanyiqiin oo
Muuqshabeelku waa dhicis
Dhegadhdheere iyo yey
Isku danqaqamaa dhalay!

Dhabtu inay sidaa tahay
Runta ay u dhowdahay
Hooyadii ka dhogor badan
Aabbihii na dhabarkiyo
Jiifaa ka dhega'weyn
Wuu dhafoorro godanyahay
Dhowaan aragga mooyee
Dhaayihiisu eegmada
Ma arkaan wixii dheer,
Dhaleecada intaasuu
Ku darsaday dhabcaalnimo
Iyo cadho dhowaanoo
Caallaha ka dhirif badan
Waa macangag dhega'adag
Ma dhergaa la yidhi badi!

Nin hubaa siduu dhigay
Dhalanrogan baxaalliga
Wuxuu bahalo dheeryahay
Kuma dhaadto weerkiyo
Dhaqammada bahdiisoo
Dhulukhdhaalukh waa keli
Dhab aan loo aqoon weli!

Teeda kale na dhabarow

Firka dhalad ahaanshaha
Sow ma ogin dhurwaagiyo
Waraabaha dhidtiiqshaa
Dhawr jaad inuu yahay
Dalxow uu la dhalanyahay
Oy dhoyla'aantiyo
Dhudtinta ba wadaagaan!

Ragga hadal-dhegeystaa
Dhaaxo waxay yidhaahdaan
Waa Jin-arag dhurwaayadu
Isagiyo dhalshiisiyo
Xooluhuu dhaqda ba cuna,
Dhaw ayuuna leeyahay
Dhigidtaanka faalkana
Loogama dhagsiisoo
Falka wuu ku dheeryahay!

Ma dhiirrana waraabuhu
Waxse uu ku dhaamaa
Bahallada dhiggiisa ah
Abaal dhigasho weeyoo
Raq dharaarta uu helo
Wuxuu ugu dhawaaqaa
Dhammi habardugaag oo
Wirix qosol dhaglayniyo
Qayladhdhaanta goortuu
Dhammi kaalayaay yidhi
Bay soo dul dhoobtaan
Dhinacyada ka buuxshaan!

Jaamocow dhaliilaha
Ceebaha dhurwaayada
Lagu sheego dhammidood
Waxa debedda soo dhigay
Ayaamahan tan uu dhidar
Aqoonli'i dhegraaricin
U dhegaysanaayoo
Dhoohane ku maranyahay!

Dabadhdhiliftu waa tii
Maalin uu dhalaal iyo
Dhaashi doonasho ahaa
Sheegkada dhigaalka leh
Tis dhurwaa dhigaa jirey,
Waxa jirey dharaar uu

Dhexfadhiistay qaxan iyo
Dhamac ay ka bood tidhi,
Dharbaaxada libaaxxii
Dhanka fujiyey waagii
Dhagarleydu iyadaa
Ka danbeysey dhagartoo
Ku dhawaaq codkii tidhi
Dhibaadtadu ka raacdoo
Dhinbiluhu ka duuleen!

Dhagarley dhurwaa abid
Uma teella dhiganine
Tiisoon dhammaan iyo
Dhaax wuxuu ku bixijirey
Oogo dhalan'adkaantiyo
Dhirtuu kala yiqiinoo
Dhaawac goorta uu yahay
Dhaymo uu ka heli jirey!

Dhurwaa iyo anoon dhidar
Midna dhinacca saarayn
Misna talo dhigaal lehe
Dhoohanaan ku odhanlaa
Fursaddii ku dhaaftiyo
Kansho kuuma dhigantee,
Hayska layn dhallaankiyo
Dhalshaadoon wax kuu dhimin
Dholo'dholo' kadlayntiyo
Maqal dhega'adkaantiyo
Dhuurrayn u socodkiyo
Dhaaxa dhaqansilloonaa
Uunka kaa dhexsaartee
Is dhawr oo cagaha dhigo!

Hadal iyo dhammaantiis
Dheelshani sidaan qabo
Waxa ay dhextaallaa
Intii dhiigqabeennada
Ugu dhaqanxumaayoo
Ma dhammaan karaysee,
Waxaan dhaabadayntay
Odhanlaa dhurwaagani
Kol hadduu dhabiiltamid
Markan dhaqasho muujoo
Weli aan ri'dii dhiman
Dhakhso loogu kala tegin

Dhacdo weeye ugub oon
Ab'ogaa horuu dhicin
Oo u baahan dhawrniin
Dhimrin iyo sugaal mudan!

Ganey – Abwaan Xassan Ganey

Bacadle – Abwaan Bacadle

Axmeddo – Abwaan Axmed Faarax Cali "Idaajaa" iyo Abwaan Axmed Sh. Jaamac

Hurre – Abwaan Cismaan Ibraahim Warsame "Hurre walanwal – Abwaan Hadraawi walaalkii oo ka yar.

Cabdi – Abwaan Cabdi Muxumud Ammiin

Jaamac – Abwaan Jaamac Kediye

Shube – Abwaan C/qadir A Shube.

Saalax Xaashi Carab
17.03.2007, Jabbuuti